



TAAGEER ARDAYDEENA: Dib cusbooneysii Canshuuraha SPS bisha Febraayo 2025



Ardaydeenu anaga ayay nagu tiirsan yihiin. Dugsiyadooda ayaa u baahan canshuuraha ay codbixiyaashu ansixiyeen si loo buuxiyo ciriiriga ka jira maaliyada ee u dhexeeya waxa gobalku maal geliyo iyo waxa dhabta ah ee ardaydu u baahan yihiin.

Canshuurahaan ayaa maal gelinaaya barnaamijyada muhiimka ah, shaqaalaha taageerada, siiya teknooloojiyad ardayda oo xaqiijiya goobaha waxbarashada oo badqab iyo caafimaad u leh dhammaan ardayda.

Canshuurahaan maaha canshuuro cusub. Waxay keliya badelayaan canshuuraha hadda, ee waqtigoodu dhammaanaayo ee dugsiyada Seattle. Dib u cusbooneysiintooda ayaa sii wadaysa maal gelinta muhiimka ah. Haddii aan la helin canshuurahaan, waaxda ayaa waajihi doonta qarash la'aan sii baahda, taasoo carqalad dheeraad ah ku noqonaysa awoodeeda taageerada ardayda iyo shaqaalaha.

Maxay cusbooneysiinta canshuuruhu muhiim u tahay

Cusbooneysiinta Canshuuraha Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada (EP&O)

Waxay daboolaysaa meelaha ka banaan waxyaabaha gobalku maalgasho iyo waxa SPS u baahan tahay inay ku shaqeyso

- **Badqabka ardayga iyo taageerada:** Waxaa lagu bixiyaa mushaaraadka, ayna ku jiraan ilaallada dugsiya, waxbarashada gaarka ah, iyo shaqaalaha taageerada luuqadaha badan.
- **Adeegyada iyo barnaamijyada ardayda:** Waxay xaqiijinaysaa sii wadista maal gelinta waxbarashada gaarka ah, cuntooyinka caafimaadka leh ee ardayda.
- **Fursadaha ardayda:** Gobalka ayaan wax lacag ah ku bixin hawlaha ka baxsan manhajka sida ciyaaraha, farshaxanka, muusiga, iyo riwaayadaha. Canshuurta ayaa xaqiijinaysa in ardaydu ay helaan fursadahaas muhiimka ah si ay wax ugu bartaan meelaha ka baxsan fasalka.

Dib u Cusbooneysiinta Canshuurta Dhaqaalaha Dhismaha Guusha VI (BEX VI)

- Xaqiijinta dhismayaasha dugsiya oo amaan ah, casri ah oo buuxinaaya heerarka maanta ee waxbarashada iyo badqabka
- Waxay bixinaysaa maalgelinta teknooloojiyada muhiimka ah, xaqiijinta in arday kasta uu helo kumbuyuutar ama taableed uu wax ku barto
- Wuxuu kor u qaadayaa mashaariicda tamarta nadiift ah, ayagoo dugsiyadeena ka dhigaaya kuwo tamarta tashiilaaya hoosna u dhigaaya qarashaadka shaqada

Sida aad Noo Caawin Karto:

- **Ku deeq:** Deeqdaada ayaa naga caawinaysa maal gelinta wacyi gelinta si aan u xaqiijino in codka HAA aan u helno canshuurahaan.
- **Mutadawac noqo:** Nagula soo biir dedaalka adigoo ku tabarucaaya faafinta fariinta si aan uga caawino dugsiyadeena inay guul gaaraan.

Cod Kasta Waa Muhiim - Aan taageerno Ardaydeena si Wadajir ah!

<https://seattleschoolsfirst.org>

